

aMASE: advancing Migrant Access to health Services in Europe (Hormarinta

Helitaanka Adeegyada caafimaad ee Muhaajiriinta
Yurub)



Xaashida
Macluumaadka



Adiga oo naga caawiya, waxaan ka sii wanaajin karnaa adeegyada HIV ee loogu talagalay dadka ku cusub Yurub

Waxaan ku weyddiisanayna inaad ka qayb qaadato daraasad intii hore in kabadan lagu ogaanayo caqabadaha daryeelka caafimaadka ee muhaajiriinta ku nool Yurub haysta. Kahor inta aadan ka qayb qaadan waa muhiim inaad fahanto sababata loo qabanayo hawshan. Fadlan u qaado wakhti kugu filan si aad u akhrisato macluumaadka soo socda. Fadlan [annaga na weyddii wixii kasta ee](#) aan kuu caddayn ama haddii aad wax dhibsanayso. Wakhti u qaado aad ku go'aansanayso ka qaybgalkaaga ama qaybgal-la'aantaada.

Ku saabsan aMASE...

Dadka ka yimaad adduunka oo idil ayaa isticmaala adeegyada caafimaadka Yurub. Kuwa ku dhashay dibadda inta badan ayaa caawimaad ka raadsada goobaha adeegyada HIV kaliya marka ay aad u jirraadaan oo taasina waa mid aad ugu xun caafimaadkooda. Si aan u ogaano waxa dadku qaarkood iska hortaaga horay u imaanshaha caafimaadkaaglamada iyo adeegyada HIV ayaan u qaadaynaa daraasaddan. Macluumaadkan markaan helno waxaan awood u heleynaa inaan horumarino adeegyada loogu talagalay dhammaan dadka isticmaalaya adeegyada caafimaadka Yurub.

Su'aalaha badiyaa la Waraysto

Ayaa qabanaya cilmi-baadhistan?

Cilmi-baaristan ah waxa maalgeliya Midowga Yurub. Waxa fuliya cilmi-baadhayaal ka soo jeeda University College London iyo Macadka caafimaadka Carlos III ee ku taal Isbayn. Drs Fiona Burns iyo Julia del Amo ayaa mas'uul ka ah mashruuca iyo dhammaan xogta. Ansixinta anshaxa daraasadda wax laga helay Gudduga Anshaxa Cilmi Baadhista London Bentham.

Maxaa aniga la ii weyddisanaya?

Waxaan u baahan nahay dadk ku nool meel ka baxsan dalkay ku dhasheen oo noo sheega waxay kala soo kulmeen adeegyada caafimaadka si aanu u ogaano waxa wanaagsan, waxa xun iyo waxa laga wanaajin karo sidii hore. Haddii aad ka weyn tahay 18 jir, markaa fikradahaagu waa waxa ku ool.

Ma inaan ka qayb qaataa?

Adiga ayay kugu xidhan tahay inaad ka qaybgasho ama inaad ka qaybgalin. Haddii aad go'aansato inaad ka qayb qaadato waxaad daabacan kartaa xaashidan si aad u haysato. Waxa lagu weyddiin doonaa in aad sax ku samayso meesha sanduuqa ee bilowga su'aalaha ku yaal si aad u sheegto inaad oggoshahay inaad ka qayb qaadato. Inaad maskaxdaad beddesho oo aad arrinta ka noqoto kaliya iska xidh su'aalaha.

Maxaa ah inaad sameeyo?

Ka qeybqaadashada waxa ka mid ah buuxinta xogwaraysiga ku saabsan sida loo isticmaalayo adeegyada caafimaadka. Waxa kale oo lagu weyddiin doonaa su'aalo shakhsiyedd (tusaale ahaan, dhaqanka galmada, iyo isticmaalka daroogada la isku duro). Su'aaluhu waa inayqaataan qiyaastii 15-20 daqiiqo si loo dhammaystirto. Qaar ka mid ah su'aalaha ayaa aad shaqsiyan u ah. Su'aal kasta oo aadan runtii rabin inaad ka jawaabto, ama dareento in aadan ka jawaabi karin, waa la iskaga boodi karaa.

ka qaybgalkayga daraasaddan qarsoodi ma lagu hayn doonaa?

Haa. Dhammaan macluumaadka ayaa si xafidan loo asturayaa. Ma weyddiino wixii kasta ee xog la isku garan karo ah si markaa adiga aan lagaaga garan qofkaad tahay jawaabahaaga. Dhammaan jawaabaha aad bixiso waa qarsoodi oo si ammaan leh ayaa loo hayn doonaa.

Maxaa alagu samayn doonaa natiijooyinka daraasadda?

Natiijooyinka ayaa lala wadaagi doonaa bulshooyinka muhaajiriinta ka jiraa dhammaan dalalka Yurub, iyo NHS iyo ururrada u heellan caafimaadka iyo fayaqabka beeshaada. Waxa kale oo waliba lagu qori doonaa daabac ahaa joornaallada cilmiyeed. Haddaad xiiseyneyso, nuqullada natiijooyinka ayaa laga heli karaa kooxda cilmi-baarista.

Maxaa dhacaya hadday jirto dhibaato?

Haddii aad qabto wax welwel ah ama su'aalo ah waa inaad marka hore la xidhiidhaa Ms Ibidun Fakoya oo aad ugu dadaali doonta inay uga jawaabto su'aalahaaga sida ugu fiican. Faahfaahinta lagula xiriirayo iyada waxa lagu bixiyay dhammaadka xaashidan macluumaad. Haddii aadan ku faraxsanayn wax oo aad rabto inaad si rasmi ah uga cabato, waxaad sidaas ku samayn kartaa adiga oo u mara Taageeraha Maamulka Cilmi-baarista, University College London adiga oo kala xiriiraya: 020 7380 9937, xogashada tixraaca 11/0237.

Macluumaad dheeraad ah

Wixii macluumaad, talo, taageero lacag-la'aan ah ama inaad qof kala hadasho arrimaha ku saabsan daraasaddan, fadlan [imayl u dir kooxda cilmi-baadhista](#) ama la xiriri urarrada ku hoos qoran hoosta: [:http://www.amase.eu/wp/organisations/](http://www.amase.eu/wp/organisations/)

Waad ku mahadsan tahay inaad wakhti u qaadato ka qaybgalka daraasaddan.

Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir ah oo ku saabsan daraasaddan

Dr Fiona Burns (0203 108 2078) • Ms Ibidun Fakoya (0203 108 2078)